



## Bisha Taariikhda Dadka Madow oo bilaabantay

Bisha Taariikhda Dadka Madow waxaa lagu aqoonsanayaa doorarka ay Maraykanka Madow ka soo qaateen qarankeena iyo dhaqankeena. Taariikhyahanka Carter G. Woodson ayaa Toddobaadka Taariikhda Dadka Madow bilaabay toddobaadkii Febraayo 1926 si loo dhiirigeliyo waxbarista taariikhda madow. Ugu dambeyntii, waaxaha waxbarashada gobolka ee waddanka oo dhan ayaa bilaabay in ay taageeraan dadaalka.

Markii la soo gaaray 1976 Bisha Taariikhda Dadka Madow waxaa looga dabaaldegay waddanka oo idil. Madaxweyne Gerald Ford ayaa aqoonsaday Bisha Taariikhda Dadka Madow intii lagu jiray sanad guuradii laba boqolaad ee Maraykanka, isaga oo Dadka Maraykanka ah ku booriyay in ay sharfaan guulaha ay gaareen Maraykanka madow “ee dhinacyada dadaalka ee inta lagu soo jiray taariikhdeena.”

Dugsiyo gaar ah oo ka tirsan Dugsiyada Dadweynaha Portland ayaa inta lagu jiro Febraayo qabanaya Bilaha Taariikhda Dadka Madow, oo uu ka mid yahay mashruuca bisha soconaya ee “Dream Flags” oo ka dhacaya Dugsiga Sare ee Roosevelt. Dhammaan ardayda dhigata RHS waxaa lagu dhiirigelin doonaa in ay wax ka qoraan riyoyinkooda, iyaga oo ku saleysana gabayadii qoraagii madowga ah ee Langston Hughes. Waxay qoraalladdooda u isticmaali doonaan in ay ku qurxiyaan calamada gaarka ee la suri doono meelaha wax lagu soo bandhigo. Waxyaaban wax lagu soo bandhigayo waxaa la suri doonaa goobaha ardaygu wadaagaan ee dugsiga inta lagu jiro bisha.

*-Pamela Jordan*